# Maxaan Yeelayaa Marka Aan La Kulmo Ciidanka Nabadgelyada?

*Ogsoonoow xuquuqda aad leedahay marka ay su'aalo ku weydiinayaan ciidamada nabadgelyada*

### Waa maxay nooca ciidamada ee laga yaabo in ay su'aalo i waydiiyaan?

Waxaa laga yaabaa in saraakiil kala duwan su'aalo ku weydiiyaan, oo ay kamid yihiin saraakiisha gobolka iyo kuwa degaanka, Kooxaha La Dagaalanka Argagixisada, saraakiisha FBI, Wasaaadda Arrimaha Gudaha (oo ay ka mid yihiin Ciidamada Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha), Ciidankla La Dagaalanka Maandooriyayaasha,Dambi baarayaasha Mileteriga,ama hay'dahaha kale

### Khasab miyey igu tahay in aan ka jawaabo su'aalaha saraakiisha ciidanka nabadgelyada?

Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato sida uu dhigayo dastuurka. Guud ahaan, waajib kuguma aha in aad la hadasho ciidanka nabadgelyada (ama qof kalaba), xitaa haddii aadan xor aheyn oo aadan ka tagi karin saraakiisha, ama aad xiran tahay ama xabsi lagu dhigo. Laguguma ciqaabi karo haddii aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha. Waxaa haboon in aad qareen la hadasho ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha. Guud ahaan, qaali ayaa ku amri kara in aad ka jawaabto su'aalaha. (Dadka aan heysan dhalashada waa in ay akhriyaan Qeynta IV (Section IV) si ay uga helaan macluiumaad dheeraad ah.)

### Ma waxaa jiro xaalado ka baxsan fikradda guud ee ah in aysan khasab igu aheyn in aan ka jawaabo?

Haa, waxaa jira laba xaaladood oo ka baxsan. Marka koowaad, mararka qaarkood, waa in aad u sheegtaa magacaaga ciidanka nabadgelyada haddii lagu weydiiyo oo lagu yiraahdo aqoonsigaaga sheeg. Xitaa haddii aad magacaaga sheegto, waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha. Midda labaad, haddii adiga oo gaari wada ciidamadu ku joojiyaan, saraakiishu waxa ay waajib kaaga dhigi karaan in aad tusto leesinkaaga, lahaanshaha gaariga iyo ceymiska gaariga (laakiin kuma khasbanid in aad su'aalaha ka jawaabto). (Dadka aan heysan dhalashada waa in ay akhriyaan Qeynta IV (Section IV) si ay uga helaan macluumaad dheeraad ah.)

### Ma codsan karaa in aan qareen la hadlo ka hor inta aan ka jawaabin su'aalaha?

Haa, Waxa uu dastuurku kuu ogolyahay in aad la tashato qareen ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha, haddii ay booliisku kuu sheegaan xuquuqdaas ama aysan kuu sheegin. Shaqada qareenku waa inuu ilaaliyo xuquuqdaada. Marka aad u sheegto inaad dooneyso qareen, saraakiishu su'aalo kuma weydiin karaan. Haddii ay sii wadaan inay su'aalo ku weydiiyaan, weli waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato. Haddii aadan heysan qareen,weli waxa aad sarkaalka u sheegi kartaaa inaad dooneyso qareen ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha. Haddii aad leedahay qareen, hayso warqadda qareenka ee macluumaadkiisu/

keedu ku qoran yahay. Tus sarkaalka, oo weydiiso in aad wacdo qareenkaaga. Xusuusnoow inaad qoroto magaca, hay'adda iyo telefoon lambarka sarkaalka ciidamada ee ku joojiyey oo marka aad la kulanto qareenkaaga aad siiso macluumaadkaas.

**Maxaa dhacaya haddii aan la hadlo saraakiisha ciidamada nabadgelyada?**

Wax kasta oo aad u sheegto saraakiisha ciidanka nabadgelyada waxa loo isticmaali karo si adiga liddi kugu ah. Waa in aad maanka ku heysaa in saraakiisha dawladda oo been loo sheego ay tahay fal dambiyeed laakiin in aad iska aamusnaato ilaa aad qareen la tashato aysan dambi aheyn. Xitaa haddii aad su'aalaha qaarkood horey uga jawaabtay, waad diidi kartaa in aad ka jawaabto su'aalaha kale ilaa aad ka hesho qareen.

**Maxaa dhacaya haddii ay ciidanka nabadgelyadu igu handadaan in ay xeerbeegti ay horgeyn doonaan haddii aanan ka jawaabin su'aalaha?**

Hor imaashaha xeer beegtida xeer ilaalinta waa amar ku amraya in aad maxkamadda tagto oo aad sheegto macluumaadka aad ogtahay.

Haddii ay xeer ilaalintu kugu handadaan in ay kugu khasbi doonaan in aad hor timaado xeer beegti, weli khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha isla markiiba, wax kasta oo aad tiraahdo waxaa loo adeegsan karaa dacwad liddi kugu ah. Waxaa suurogal ah in saraakiishu ku guuleystaan ama aysan ku guuleysan in ay xeer beegti ku hor geeyaan. Haddii aad maxkamad uga yeerid ka hesho sarkaal ama uu kugu handado mid, waa in aad markiiba qareen wacataa. Haddii lagu keeno maxkamad uga yeerid, waa in aad raacdaa waxyaabaha ay ku fareyso ee xiliga iyo goobta lagaa doonayo in aad tagto, laakiin weli waxa aad ku adkeysan kartaa in aad iska aamusnaaneyso maadaama wax kasta oo aad tiraahdo loo adeegsan karo dacwad liddi kugu ah.

**Maxaa dhacaya haddii la i weydiisto in aan la kulmo saraakiisha « wareysi ku saabsan la dagaalanka argagaxisanimada?**

Waxa aad xaq u leedahay in aad diido in lagu wareysto, inuu qareen goobjoog kaa haado, aad goyso waqtiga iyo goobta wareysiga, laguu sii sheego su'aalaha lagu weydiin doono, su'aalahana aad uga jawaabto sida aad dooneyso. Haddii lagu xiro sababtu wixii ay doonto ha ahaatee, waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato. Wax kasta oo dhaca, ku talo gal wax walba oo aad tiraahdo in la diiwaan gelinayo. Xusuusnoow saraakiisha oo been loo sheego in ay tahay fal dambiyeed.